San Diego Unified School District

Office of the Associate Superintendent
Special Projects Division
Program Monitoring Department

Nidaamka Hawlgalka Waalidka ee Dugsiyada Barnaamijka Title I ku jira

Tilmaamaha loogu talagalay Hirgelinta

Si loo xaqiijiyo wada shaqeynta jaalnimo ee ka dhexeysa dugsiyada barnaamijka Title I, waalidiinta, iyo jaaliyada, guddiga waxbarashadda, iyagoo la shaqeynaya maamulka waxay u heellan yihiin in:

1. **Waalidiinta iyo dadka ardeyda masuulka ka ah u hawlgalaan sameynta qorshaha degmada ee barnaamijka Title I, iyo hagaajinta habka ay dugsiyadu u shaqeeyaan.**

   Degmadu waxay hawlgalka waalidiinta fursado u siin doontaa inay:

   a. *Ka qeybqaadashada horumarinta iyo dib-u-eegista Qorshaha Ha'ayadaha Waxbarashadda ee Deegaanka.*
   b. *Ka qeybqaadashada Qiimeynta Qorsho Sannadeed LEA. Ee ay isku soo dubariday Golaha La-talinta Degmada (DAC) ee barnaamijyada mag-dhawga waxbarashadda.*
   c. *In warbixinada lala wadaago sida ay dugsi kasta uga soo gudiyaan Guddiga Waxbarashadda ee Deegaanka(BOE), shabakada Internetka ee waxbarashadda degmada, iyo warbixinada deegaanka BOE ee shirarka DAC kuna saabsan inay gaadheen dhammaan heerarkii looga baahnaa. (Horumar-Sannadeed Ku Filan, Tusmada Habsami- u-Socodka Waxbarashadda, Heshiiska Masuuliyadeed ee Degmada)*

2. **Dugsiyada ka qeybgalaya qorsheynta laga caawiyo isku dubbaridka, xaga farsamada iyo taageerooyinka kale ee ay u baahan yihiin, taas waxay u suurtogelinaysaa hawlgalka waaluidiinta, si waxbarashadda ilmaha iyo horumarka waxbarashadda dugsiyadu ay sare ugu kacdo.**

   Degmadu waxay samey doontaa:

   a. *Inay Xarunta Waalidiinta ee Harold J. Ballard tababar ku bixiso.*
   b. *Inay Waaxda Qorsheynta iyo Masuuliyaduhu tababar siiyaan Goleyaasha Goobaha Dugsiga iyo Guddiyada La-talinta Ardeyda Af Ingiriisiga Baraneysa.*
   c. *Inay Xafiiska Jaalnimadu tababar siiyaan Tababarada Waalidiinta Iskaa-wax-u-qabso loogu talagalay.*
   d. *Inay shaqaalaha tababaraan ama bixiyaan qalabka ka caawinaya inay waalidiintu u hawlgalaan waxbarashadda ilmahooda si ay sare ugu kacdo.*

3. **La kobciyo awooda dugsiyada, shaqaalaha, iyo waalidiinta ama dadka ardeyda masuulka ka ah si loo helo hawlgalka waalidiinta oo hufan, adag oo sii socda si waxbarashadda carruurta loo hagaajiyo.**

Degmadu waxay sameyn doontaa:

a. *Inay Xarunta Waalidiinta ee Harold J. Ballard waalidiinta ku siiso tababarka hoggaaminta la xidhiidha.*
b. *Inay tababar u fidiso xubnaha Golaha Goobta Dugsiga, waxaana tababarkaas bixin doona Waaxda Dabagalka ee Barnaamijka.*
c. *Inay dhammaan waalidiinta ku siiso casharada Kulliyada Waalidiinta Xarunta Waalidiinta ee Harold J. Ballard.*
d. *Inay tababar ku siiso xubanaha Golaha La-taliyaasha ee Degmada (DAC) dhammaan hawlaha la xidhiidha barnaamijka Title I shirka bil kasta la qabto.*

4. Isku-dubbaridka iyo Isdhexgelinta tabaha hawlgalka waalidka ee barnaamijka Title I ee tabaha hawlgalka waalidiinta ee barnaamijyada kala duwan.

Degmadu waxay sameyn doontaa adeegyada isku-dubbaridka ee dhex maraya:

a. *Xarunta Macluumaadka Waalidiinta ee Jaaliyada California (CPRC) iyo Xarunta Waalidiinta ee Harold J. Ballard.*
b. *Hawlgalka Waalidka, Jaaliyada iyo Ardeyda ee San Diego Unified School District iyo Xarunta Waalidiinta ee Harold J. Ballard.*
c. *Barnaamijyada Kobcinta Ilmaha ee San Diego Unified School District iyo Xarunta Waalidiinta ee Harold J. Ballard.*

5. In iyadoo lala kaashanayo hawlgalka waalidiinta iyo dadka ardeyda masuulka ka ah la sameeyo qiimeyn-sannadeed ku saabsan sida hufan ee ay wax uga qabsoomeen nidaamka hawlgalka waalidiinta ee sare u qaadista waxbarashadda dugsiyada barnaamijka Title I ku jira:

- **In la ogaado inay si wanaagsan uga soo qaybgaleen dhacdooyinka hawlgalka waalidiinta iyo dadka ardeyda masuulka ka ah, iyadoo si gaar ah indhaha loogu haynayo waalidiinta ama dadka masuulka ah ee uu dhaqaalahoodu liito, kuwa curyaamiinta ah, kuwa ay aqoontooda af Ingiriisigu hooseyso, aqoontooda waxbarasho ay yar tahay, ama ka soo jeeda jinsiyadaha laan-gaabka ah.**
- **In la sameeyo qiimeyn si loo helo tabaha waalidiinta sida wacan loogu hawlgelin lahaa.**
- **Haddii loo baahdo, in dib loo fiiriyo nidaamka hawlgalka waalidka ee degmada iyo dugsiga.**

Degmadu waxay sameyn doontaa:

a. *In shirarka waalidiinta iyo jaaliyada loo fidiyo adeegyada tarjumista, marka ay ku habboon tahay.*
b. *In laga qaybgalo Qiimeyn Sannadeedka Nidaamka Hawlgalka Waalidka ee degmada, iyo inta la isku-dubbarido uruurinta iyo ka warbixinta ee ay sameeyeen dhammaan kooxaha degmada ee wax qiimeeya ee Golaha La-talinta Degmada (DAC) ee barnaamijyada mag-dhawga waxbarashadda.*
c. *In laga qaybgalo dib-u-eegista nidaamka hawlgalka waalidka ee degmada, hadba sidii loogu baahdo, sida natiijooyinka qiimeyntu ay tilmaameyaan.*
d. *In Golaha La-talinta ee Degmadu (DAC) ay dib u fiiriyaan barnaamijyada lagu Isticmaaleyo Xoojinta arrimaha miisaaniyada la xidhiidha.*

6. In lagu hawlgaliyo waalidiinta iyo dadka ardeyda masuulka ka ah dhacdooyinka iyo tabaha dugsiyada ay barnaamijka Title I u adeegto.

Degmadu waxay xaqiijin doontaa:

a. *In wada hadal labada dhinac ah oo joogto ah uu dhex maro heer goobeed (aag) iyo heer degmo sida ku cad nidaamka waxbarashadda degmada.*
b. *Dhammaan dugsiyada barnaamijka Title I waa inay helaan meelo loogu talagalay dhacdooyinka hawlgalka waalidiinta.*
c. *Shirarka waxaa la qabtaa wakhtiyada ay ku habboon tahay inay waalidiintu ka soo qaybgeli karaan.*
d. *Waalidiinta waxaa lala socodsiin doonaa marka dugsigu uu noqdo mid loo aqoonsadey inuu galay Barnaamijka Dib-u-hagaajinta u baahan, iyo in lagala taliyo adeegyada iyo doorashooyinka ay xaqa u leeyihiin inay heelaan ikhtiyaariyada doorashada Barnaamijka Dib-u-hagaajinta u baahan iyo Adeegyada Waxbarashadda Dheeraadka ah.*